

## Oggaysiiska iyo Helida Mas'uuliyada

### Notice and Finding of Responsibility

Oggaysiiskan iyo Helida Mas'uuliyada (NFR) waxaa laguugu soo dirayaa sida in ay tahay oggaysiiskaaga ugu horeeya ama maadaama ay isbedeshay tirada cadadka kaqayb qaadashadaada tan iyo Oggaysiiska iyo Helida Mas'uuliyada ugu dambaysay ee lagu soo diray. Waa xusuusin in aad leedahay mas'uuliyad ah in aad bixisid qaybta lacagta daryeelkaaga sida looga xadiday dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS). Fiiri RCW 43.20B.430, 43.20B.435 iyo WAC 388-835-0940. Xusuusnoow, kaqayb galku waa wadaagistaada bilaha ah ee aad wadaagtid qiimaha daryeelkaaga, taageeradaada, iyo daaweyntaada ee ka jirta meesha RHC. Adiga waxaa lagaaga baahanyahay in aad bixisid lacagta kaqayb galkaaga bil walba. Waxaad heli doontaa qoraal biil bil walba ah midkaas oo ay la socoto bakhshad dib loo soo celinayo iyo warqad rasiid. Warqada rasiidka ah waa in lagu daraa lacag bixintaada.

Xafiiska Adeega Bulshada ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (CSO) ayaa xisaabanaya waajibaadka lagaaga baahanyahay sida waafaqsan WAC 388-513-1380 kadibna tirada lacagtaasi ayaa lagu darayaa warqadan. Xafiiska Adeega Bulshada ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ayaa go'aaminaya qiimaha lacagta kaqayb galkaaga ayada oo ay tahay si ku salaysan baaritaanka lagu sameeyo ilahaaga dhaqaale.

#### **Maxaa loo sameeyay isbedel?**

Tirada lacagta kaqayb galkaagu way isbedelaysaa intiiba ay isbedelayso dakhligaaga iyo kharashaadkaaga. Xafiiska Adeega Bulshada ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ayaa u xisaabinaya lacagtaada kaqayb galka cusub si ku salaysan macluumaadka cusub ee la bixiyay kadibna kugu soo wargelin doona isbedelkaaga ku dhacay kaqayb galka.

#### **Maxaa dhacaya haddii aanan oggolayn Oggaysiiskan iyo Helida Mas'uuliyada?**

Haddii aanan oggolayn ama qabtid su'aal, waxaad ka wici kartaa xarunta adeega macamiilka ee Xafiiska Adeega Bulshada ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada lambarka teleefoonka lacag la'aanta ah ee 1-877-501-2233 si aad muraajaco ugu samaysid koontadaada xisaabta.

Haddii aanan weli oggolayn oona doonaysid in aad rafcaan ku samaysid oggaysiiskan, waxaad ku codsan kartaa maamul dhagaysi gudaha 30 maalmood oo laga joogo marka aad heshid oggaysiiskan. Codsigaagu waa in uu ahaado mid qoraal ah oona dib loogu soo diro nuqul ku saabsan warqadan cinwaanka soo socda:

ATTN: Office of Administrative Hearing (OAH)  
PO Box 42489  
Olympia, WA 98504-2489

Waxaa laguugu soo wargelin doonaa tooska boostada, marka iyo goorta la imaanayo dhagaysiga. Qaali maamul sharciyeed ayaa dhagaysan doona kiiskaaga kadibna go'aan u gaari doona si ku salaysan macluumaadka aad sheegtid.

#### **Maxaa dhacaya haddii aan ku guuldaraysto in aan lacagta bixiyo?**

Haddii aad ku guuldaraysatid in aad bixisid deyntaan, waaxdu waxay qaadan kartaa lacag aruurin dheeraad ah ayada oo samaysa fayl rahaamad lid ku ah hantidaada ma guurtaanka ah, in la qaato hantidaada kale ay ku jirto balse aanan ku ekayn koontooyinka bangiga iyo/ama la qaato mushahaarkaaga. Sidoo kale waxaynu ka codsan karnaa maxkamada ama Maamulka Dammaanada Bulshada ama il kale oo dakhli ah in uu noo sheego xarunta aad degantahay maadaama aad tahay lacag bixiyaha. Waaxdu marna ma saarna wax waajib ah in ay kugu soo wargeliso wax kale oo tallaabo dheeraad ah.